



## Xafiiska Qarammada Midoobay u Qabilسان Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

### **WAR-SAXAAFADEED 13/2010**

#### **Shirka Istanbul ee Soomaaliya waa guul u soo hoyatay dhammaan dhinacyada ay arrintu khuseyso**

Istanbul, 24 May 2010 – Ka dib markii la soo xiray shirkii Istanbul ee Soomaaliya, Ergeyga Gaarka ee Qaramada Midoobay, Ahmedou Ould-Abdallah, wuxuu maanta sheegay in kulanka seddaxda maalmood qaataay uu ahaa “mid guul weyn keenay” oo ay ka soo baxeen “hindiseyaal muhim ah oo la taaban karo.”

“Shirkan wuxuu ahaa mid wax qabad weyn u leh bulshada caalamka iyo dadweynaha Soomaaliyeedba, in ka badan 50 waddan, iyo 20 wasiir ayaana ka qaybqaatay hindisahan lagu billaabayo dhismaha kaabeyaal dhaqaale ee waxtar leh oo xoojin doona nabadda iyo xasilloonida Soomaaliya.”

Kulanka seddaxda maalmood qaataay, laga billaabo 21kii ilaa 23kii May, waxaa soo wada abaabulay Qaramada Midoobay iyo Dowlaad Turkey. Kulamada heerka sare ah ka sokow, waxaa jiray wadatashi iyo doodo si la taaban karo u dhexmaray ganacsatada Soomaaliyeed, bulshada ganacsatada caalamka iyo hay’adaha horumarinta kuna saabsanaa lix dhinac oo muhim u ganacsiga oo kala ah: isgaarsiinta, kaabayaasha gaadiidka, bangiyada iyo xawaaladaha, xoolaha nool, kalluumeynsiga iyo tamarta beddelka ah. Doodahaasi mid walba waxay ku dhammaatay talooyin la soo jeediyay si sare loogu qaado hawsha lagu soo bandhigay kulamada, waxaan ka mid ah in dhinacyada ganacsiga loo dejiyo siyaasado iyo hanaan sharciyo lagu habeynayo iyo in la hormariyo tayadhis iyo tababar gooni u ah dhinacyada gnacsiga.

Baaqii Istanbul ee la soo saaray ka dib markuu shirku dhammaaday wuxuu hoosta ka xarriiqay in loo baahanyahay in la xoojiyo hirgelinta Heshiiskii Jabuuti. Wuxuuna mar kale xaqiijiyay in “loo baahan yahay, si looga gudbo dhibaatada iyo amaan darrada maanta taagan, in Dowlaad Soomaaliya ay bixiso dadaal adag oo waqtii dheer qaadanaya si ay u hormariso wadashaqayn siyaasadeed una dhisto hay’ado dowladeed oo xoog leh” iyadoo baaq u jeedinaysa kuwa khatarta ku ah inay khalkhal geliyaan geeddisocodka nabadda.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qabilسان isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qabilسان Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)

Baaqu wuxuu kaloo garowsaday dadaalka uu bixinayo ciidanka nabadilaalinta Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) iyo kaalinta urur goboleedyada, oo ay ka midyihiiin Urur Goboleedka IGAD iyo Jaamacadda Carabta iyo weliba Bangiga Horumarinta Islaamka. Bangigu wuxuu soo jeediyay in la sameeyo Koox Shaqo oo ay isugu yimaadaan hay'adaha horumarinta si ay "ugu gurmadaan baahida degdegta ah ee Soomaaliya inta dalka xasillooni lagu soo dabaalayo." Kooxda Shaqo Dowladda Turkey ayaa guddoomin doonta.

"Anigoo ku hadlaya magaca Xoghayaha Guud iyo Qaramada Midoobay, waxaan jecelahay inaan Ra'iisal Wasaaraha iyo Xukuumadda Turkey ugu mahadceliyo martigelinta Shirka. Waxaa kaloon mahad u soo jeedinayaan ganacsatada gaarka ah, hay'adaha horumarinta, hay'adaha Qaramada Midoobay, bulshada ganacsatada Soomaaliyeed iyo Jaaliyadda Soomaalieed ee Qurbaha ku nool oo kaalmo ka geysan karta mustaqbalka dhaqaalaha dalkooda, iyo nabadda iyo xasilloonida taas la socota," ayuu yiri Md. Ould-Abdallah.

"Sidoo kale waxaan jecelahay inaan ku celiyo inaan taageerayno Xukuumadda iyo Barlamaanka oo aan ku dhiirrigelinayno dadaalka ay ugu jiraan inay midaysanaadaan gacantana ku hayaan hawlaha muhimadda leh."